FOR YOUTH DEVELOPMENT®
FOR HEALTHY LIVING
FOR SOCIAL RESPONSIBILITY

OGEYSIISKA QARSOODI KA DHIGISTA EE HIPAA IYO QIRITAANKA IN LAGU SIIYEY OGEYSIISKA HIPAA

OGEYSIISKAN WAXAA LAGU FAAHFAAHIYEY SIDA MACLUUMAADKIINA GAARKA AH LOO ADEEGSANAYO AMA LOOGU GUDBINAYO HAY'ADAHA KALE IYO SIDA AAD KU HELI KATAAN. FADLAN SI TAXADAR LEH U AKHRI

Kani Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka ee Xarunta George Wellbeing ee YMCA "YMCA George Wellbeing Center." Erayada "anaga" "waxeena" iyo "inaga" ee ku xusan ogeysiiskan waxaa loola jeedaa Xarunta George Wellbeing ee YMCA.

Xarunta George Wellbeing ee YMCA waxa ay keydisaa diiwaanka iyada oo ku dadaasha ilaalinta iyo Qarsoodi ka Dhigista Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Qof Ahaaneed iyada oo dhaqan gelisay habka ugu yar ee lagu ilaaliyo wadaagista Macluumaadka Caafimaadka ee Qof Ahaaneed. Heerka ugu yar ee muhimka u ah qarsoodi ka dhigista macluumaadka waxa uu xadidaa adeegsiga, gudbinta iyo ujeedada loo codsado, iyada oo sidoo kale la xadido cidda ka tirsan Xarunta ee heli karta macluumaadka caafimaadka ee sharcigu ilaaliyey, iyo xaaladaha ay ku heli karaan iyo nooca shaqada ay qabtaan.

Sharciga ayaa waajib nooga dhigaya in aan qarsoodi ka dhigno Macluumaadka Caafimaadka ee Qof Ahaaneed. Waxaa nalaga doonayaa in aan ku siino Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista ee sharciyada qarsoodi ka dhigista ee ay soo saartay sharciga Ilaalinta Macluumaadka Ceymiska Caafimaadka ("HIPAA") ee 1996, & Macluumaadka Teknoolajiyada ee Dhaqaalaha Iyo Goobaha Caafimaadka ee 2009 ("HITECH")

Ogeysiiskan Waxa uu faahfaahinayaa sida aanu u ilaalineyno Macluumaadka Caafimaadkaaga Shaqsiga ah ee aan kaa heyno ee la xiriira macluumaadka caafimaadka ama Macluumaadka Caafimaadka ee shaqsiga ah. Macluumaadka Caafimaadka ee Qof Ahaaneed waa kan macluumaadka caafimaadka iyo kan kale ee adiga kugu saabsan, oo ay ka mid yihiin macluumaadka dadweynaha, ee lagugu aqoosan karo iyo kan kale ee la xiriira caafimaadka dhimirka ee waqti hore iyo kan iminka la joogo iyo xaaladaha horey lagaaga daaweeyey. (Sharciga HIPAA waxa uu istricmaalaa erayga Macluumaadka Caafimaadka Qofka Ee La Ilaaliyey" halka aan isticmaalo "Macluumaadka Caafimaadka ee Qofka.")

Ogeysiiska Qarsoodi ka Dhigista Macluumaadka waxa uu faahfaahin ka bixinayaa sida loo adeegsanayo ama loo sii gudbinayo Macluumaadka Caafimaadka Ee Qof Ahaaneed si loo helo bixinta kharashka ama hawlgalka caafimaadka ama ujeedooyinka kale ee sharcigu ogol yahay. Waxa kale oo uu faahfaahin ka bixinayaa xaqa uu qofku u leeyahay inuu ogaan karo oo maamuli karo Macluumaadka Caafimaadka ee Qof Ahaaneed.

Waxaa waajib nagu ah in aan u hogaansanaano qodobada Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka. Wax ayaanu ka bedeli karnaa qodobada ogeysiiskeena markii aan doono. Ogeysiiska cusub ayaa lagu maamulayaa dhamaan Macluumaadka Caafimaadka ee Qof Ahaaneed ee aan heyno mar kasta. Waxaa kale oo suurogal ah in ogeysiiskan dib loogu noqdo haddii uu jiro isbedel la taaban karo oo ku saabsan isticmaalka iyo sii gudbinta Macluumaadka Caafimaadka Qof Ahaaneed, xuquuqdaada, mas'uuliyadda sharciga ah ee na saaran, iyo qodobada kale ee khuseeya ee lagu sheegay ogeysiiskan.

Lixdan maalmood gudahood ee marka lagu sameeyo isbedelkaas waxaa la idiin soo bandhigayaa nuqul ka mid ah ogeysiiska oo aad ka heleysaan goobta daaweynta. Waxaa intaa dheer, in la idin siinayo nuqul ka mid ah Qarsoodi ka Dhigista Macluumaadka ee wax laga bedelay marka aad codsataan.

Sidee Ayaan U Adeegsaneynaa Una Sii Gudbineynaa Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah

Sababta ugu badan ee aan inta badan u adeegsaneyno ama u sii gudbineyno Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah waa ka shaqeynta iyo dib u eegista codsiyada ku saabsan ceymiska caafimaadka iyo bixinta kharashka ee adeegyada la xiriira caafimaadka ee aad jeceshahay in aad ka qeyb qaadato. Faahfaahinta hoos ku xusan iyo isticmaalka kala duwan iyo sida loo sii gudbinayo iyada oo tusaalayaal la raaciyey.

Daaweynta: Waxaanu u adeegsaneynaa una sii gudbineynaa Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah si laguu daweeyo. Waxaanu u isticmaaleynaa oo aan u sii gudbineynaa Macluumaadkaaga Caafimaadkaaga ee Shaqsiga Ah si laguugu fidiyo, isku xirka, iyo daaweynta iyo adeegyada la xiriira. Taas waxaa ka mid ah isku xirka iyo maareynta daryeelka caafimaadka ee dhakhtar kale. Tusaale ahaan, waxaanu Macluumaadka Caafimaadka ee Shaqsiga ah, sida ay muhim u tahay, hay'adaha

caafimaadka ee kuu fidinaya daryeelka. Waxaa kale oo aan u sii gudbineynaa Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah dhakhaatiirta kale ee ku daaweynaya. Tusaale ahaan, waxaa suuro gal ah hal in Macluumaadka Caafimaadka ee Shaqsiga Ah loo gudbiyo dhakhtarka ee laguu soo diro si loo xaqiijiyo in jirkaagu helo aqoonsiga iyo daaweynta aad u baahan tahay. Waxaa intaa dheer, in aanu u gudbin karno Macluumaadka Caafimaadkaaga ee Shaqsiga ah mararka qaarkood dhakhaatiirta kale ee caafimaadka (takhusaska ama sheybaarka), oo dhakhtarkaagu ka codsado, in ay ka qeyb qaataan daryeelkaaga iyaga oo ka caawiya calaamadaha cudurka ama daaweyntaada.

Dhakhtarkaaga. Waxaa intaas dheer, in aan Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shakhsiga ah aan la wadaagi karno dadka gacanta ka geysanaya daryeelkaaga, sida dhkahtarkaaga, iyo shirkadaha iibiya qalabka daaweynta.

Bixinta Kharashaka: Waxaana suurogal ah in aan u adeegsano bixinta kharashka, maareynta qaansheegashada, lacag ururinta, iyo bixinta kharashka sida uu dhigayo heshiiska ceymiska iyo adeegyada la xiriira caafimaadka. Tusaale ahaan, waxaa suurogal ah in aan la xiriirno ceymiskaaga caafimaadka si aan u xaqiijino in aad xaq u leedahay qaar ka mid ah adeegyada aan bixino iyada oo laga yaabo in aan ceymiska la wadaagno daaweynta laguu qabtay si aan u xaqiijino in ceymisku bixinayo adeega adiga iyo qoyskaaga loo qabtay. Waxaa kale oo aan u adeegsaneynaa ama ula wadaageynaa Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah si loo bixiyo kharashka ay qolo sadexaad oo laga yaabo in ceymisku mas'uulka ka tahay sida bixinta, sida xubnaha qoyska. Sidoo kale, waxa aan u adeegsanaynaa Macluumaadkaaga Caafimaakaaga Shaqsiga Ah si aan toos kuugu soo dirno biilka iyo waxyaabaha kale.

Maamulka Caafimaadka: Waxaa suurogal ah in aan u adeegsano ama u sii gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah si aan u taageerno hawlaha la xiriira shaqadeena ee dhakhtarkaaga. Hawlahaas waxaa ka mid ah, laakiin aanay ku koobneyn, qiimeynta tayada hawsha aan qabano, halwlaha la xiriira qiimeynta shaqaalaha, tababarka shaqaalaha, farsamo yaqaanada, kalkaaliyayaasha caafimaadka, iyo shaqaalaha kale ee caafimaadka sababo la xiriira barashada, leesinka,lacag ururinta, iyo isku xirka ama diyaarinta hawlaha la xiriira ganacsiga.

Waxa aanu la wadaageynaa Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah hay'adda ganacsigeena qeybta ka ah ee inoo qabata adeegyo kala duwan (tusaale ahaan, biilasha ama adeegga gaadiidka). Mar kasta oo ay dhacdo in xafiiskeenu la wadaago hay'adaha kale ee gacansigu naga dhaxeeyo loo gudbiyo Macluumaadka Caafimaadka ee Shaqsiga Ah, waxaanu kala saxiixanaa heshiis ay qodobaadiisu ilaalinayaan xog ka dhigista Macluumaadkaaga Caafimaadkaaga ee Shaqsiga Ah.

Waxaa kale oo suurogal ah in aanu adeegsano ama u sii gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shakhsiga Ah ama aanu u diyaarino in dib loo eego, adeegga xagga sharciga ah, ama hawlo la xiriira hanti dhawrka, oo ay ka mid yihiin ka hortagga is daba marinta iyo raacista sharciyada u degsan barnaamijyada.

Waxa kale oo suurogal ah in aan u adeegsano ama u sii gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah sababo la xiriira qorsheynta ganacsiga , sida maareynta kharshka, iyo qorsheyn la xiriirta daraasad ku sameynta la xiriirta hawlgalka hay'adda. Waxa kale oo aan u adeegsaneynaa ama u sii gudbineynaa Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah hawlo la xiriira maareynta ganacsiga iyo maamulka ee ganacsigeena (ilaa inta ay taasi la xiriirto hawlgalka lagu xusay sharciyada qarsoodi ka dhigista ee HIPAA).

Daaweynta Dheeraadka Ah: Waxa kale oo suurogal ah in aan u adeegsano ama ula wadaagno Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah inaan kula wadaagno fursadaha suurogalka ah ama daaweynta kale ee aad isticmaali karto haddii aad dooneyso. Waxaa aad codsan kartaa in alaabadaas aan laguu soo dirin.

Xusuusinta Balamada: Waxaa suurogal ah in aan kula soo xiriirno si aan kuu xasuusino balamada adeegga.

Hawlaha La Xiriira dhaqaale Ururinta: Waxaa suurogal ah in aan u adeegsano amaaan u sii gudbino macluumaadka bulshada iyo xogta la xiriirta ee daaweynta uu kuu fidiyo dhakhtarkaaga, hadba sida ay muhim u tahay, si loola xiriiro hawlaha la xiriira deeq ururinta uu xafiiskeenu taageero. Haddii aad dooneyso in aan laguu soo dirin alaabadaas waxa aad codsan kartaa in aan laguu soo dirin.

Adeegga La Xiriira Caafimaadka Iyo Ka Faa'iideysigiisa: Waxa kale oo suurogal ah in aan u adeegsano ama ula wadaagno Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah inaan kula wadaagno adeegyada kale ah ama daaweynta kale ee aad isticmaali karto haddii aad dooneyso.

Sida uu Sharcigu Waajibka Nooga Dhigay: Waxa aanu la wadaageynaa macluumaadkaaga caafimaadka marka ay waajib nooga dhigayaan sharciyada dawladda dhexe, gobolka ama kuwa degaanka.

Ujeedooyinka Kale Ee Sharcigu Inoo Ogol Yahay Ee Adeegsiga Iyo Sii Gudbinta Macluumaadka Caafimaadka Ee Shaqi Ahaaneed Adiga Oo Aan Bixin Ogolaasho Qoraal Ah

Waajibku Nooga Dhigay: Waxaa laga yaabaa in aan u adeegsano ama sii gudbino Macluumaadka Caafimaadka ee Shaqsiga Ah ilaa inta uu sharcigu noo ogolyahay. Isticmaalka iyo sii gudbinta waxa ay noqoneysaa mid waafaqsan sharciga waxayna ku koobnaaneysaa inta uu sharcigu waajibka ka dhigay. Waa lagu soo wargelinayaa, haddii sharcigu waajib ka dhigayo, isticmaalka iyo sii gudbinta macluumaadkaaga.

Caafimaadka Dadweynaha Waxaa laga yaabaa in aan sii gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shakhsiga ah sababo la xiriira caafimaadka dadweynaha oo sharcigu ogol yahay si loo ururiyo macluumaadka. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in loo sii gudbiyo si looga hortago ama loo xakameeyo cudurada, dhaawaca ama naafanimada.

Cudurada Faafa Waxaa laga yaabaa in aan sii gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah, haddii sharcigu noo ogolaado, haddii aad la kulantay qof qaba cudurada faafa ama laga yaabo inuu khatar ugu jiro cudurada faafa ama faafinta cudurada ama xaalad jirta.

La Socoshada Caafimaadka: Waxaa suurogal ah in aan sii gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shakhsiga ah hay'adda la socoshada ee sharcigu u ogol yahay, sida hantidhawrka, baaritaanka, iyo dabagalka. Hay'adaha la socoshada ee doonaya macluumaadkan waxaa ka mid ah hay'adaha dawladda ee la socda nidaamka daryeelka caafimaadka, barnaamijyada manfacyada dawladda, iyo hay'adaha kale ee sharciyada barnaamijyada iyo sharciyada xuquuqda aadanaha.

Xad Gudub iyo Dayac: Waxaa suurtogal ah in aan u gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah hay'adaha caafimaadka ee sharcigu u ogolyahay si ay u helaan xad gudub ama dayac loo geystay ilmo yar. Waxaa intaas dheer, in aan u gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah haddii aan aaminsan nahay in aad tahay dhibane loo geystay xad gudub, dayac ama dagaal qoyska dhex mara hay'adaha dawladda ama sharcigu u ogol yahay in ay helaan macluumaadkaas. Xaaladdan oo kale, gudbinta macluumaadku waxa ay noqoneysaa mid waafaqsan inta sharcigu ogol yahay.

Maamulka Cuntada iyo Daawada: Waxaa suurogal ah in aan u gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah qof ama shirkad ay Maamulka Cuntada iyo Daawada u ogolaadeen si uu ula socdo tayada, badbaadada, ama wax qabadka alaabada ay maamusho FDA oo ay ka mid yihiin, ka warbixinta dhibaatada ka dhalan karta, badeecadda dib suuqa looga soo celinayo, sameynta dayactirka ama wax ka bedelka, ama in ay sameeyaan la socoshada suuqa, sida sharcigu waajib ka dhigay.

Waxyaabo La Xiriira Sharciga: Waxaa suurogal ah in aan u gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah maamulka maxkamadda uu dhageysigu ka socdo (inta uu sharcigu ogol yahay), ama xaaladaha qaarkood in laga jawaabo maxkamad uga yeerid, codsasho qoraalo dacwadda khuseeya, ama codsiyo kale oo sharciga waafaqsan.

Ciidanka Nabadgelyada Waxaa suurogal ah in aan u gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga Ah, mar haddii ay taasi waafaqsan tahay sida uu dhigayo sharciga, sababo la xiriira ciidanka nabadgelyada. Ujeedooyinka ciidanka nabadgelyada waxaa ka mid noqon kara (1) dhageysi maxkamadeed ama uu sharcigu waajib ka dhigay (2) Macluumaad kooban oo loo codsaday aqoonsi ama ujeedo la xiriirta goobta, (3) la xiriirta dhibane fal dambiyeed (4) tuhun dhimasho dhacday taasoo ka dhalatay faldambiyeed (5) marka uu dhaco fal dambiyeed halka aan ka hawlgalno (6) xaalad degdeg ah oo caafimaad oo salka ku heysa fal dambiyeed dhacay.

Baarayaasha Meydka, Maamulayaasha Qabriyada iyo Ku Deeqidda Xubnaha Jirka: Waxaa suurogal ah in aan u gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah baarayaasha meydka aqoonsi darteed, la ogaado sababta keentay dhimashada ama ay meyd baarayaashu gutaan hawsha sharcigu u ogol yahay. Waxaa kale oo suurogal ah in aan u gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah maamulayasha goobaha meydka la dhigo, sida sharcigu dhigayo, si ay u gutaan hawshooda. Waxaanu u gudbineynaa macluumaadkaas si la ixtiraamayo geerida. Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah waxaa laga yaabaa in loo adeegsado bixinta xubnaha, indhaha ama dheecaanka jirka.

Cilmi baarista Waxaa suurogal ah in aan gudbino Macluumaadkaaga Caafumaadka ee Shaqsiga ah si loogu adeegsado cilmi baaris la ogolaaday iyada oo la raacay nidaamka loo maro ee qarsoodi ka dhigista Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah.

Dhaqdhaqaaqa fal dambiyeedka: Iyada oo la raacayo sharciyada heer gobol iyo kuwa dawladda dhexe, waxaa suurogal ah in aan gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka ee Shaqsiga ah, haddii aan aaminsanahay in adeegsiga ama sii gudbinta loogu baahan yahay ka hortagga ama yareynta khatar xagga caafimaadka ama badbaadada caafimaadka dadweynaha ah. Waxaa kale oo suurogal ah in aan gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah haddii ay sidaas muhim u tahay aqoonsiga ciidanka nabadgelyada ama in dambiile gacanta lagu dhigo.

Dhaqdhaqaaqa Ciidamada Gaashaandhigga iyo Amaanka Qaranka Marka xaaladdu ku haboon tahay, waxaa suurogal ah in aan u adeegsano Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah ee xubnaha ka tirsan ciidamada gaashaandhigga (1) waxyaabaha loo arko in ay muhim u tahay taliyayaasha ciidamada ; (2) ujeedo la xiriirta garashada Waaxda Arrimaha Ciidamada hawlgabka ah ee macaashka; (3) ciidamada wadamada dibadda oo haddii aad ka tirsan tahay ciidamadaas. Waxaa kale oo suurogal ah in Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah oo u ogolaanaya xafiisyada dawladda dhexe sababo la xiriira nabadgelyada ama sirdoonka, oo ay ka mid tahay adeegga la xiriira badbaadada Madaxweynaha ama waxyaabo kale sharcigu ogol yahay.

Magdhawga Shaqaalaha Waxaa kale oo suurogal ah in aan sii gudbino Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah sii gudbino si aan u hogaansanaano sharciyada magdhawga shaqaalaha iyo kuwo kale oo la mid ah sharciyada iyo barnaamijyada la xiriira.

Xuquuqdaada Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah Ee Aan Kaa Heyno iyo Sida Aad U adeegsan Karto Xuquuqdaas.
Waxa aad xaq u leedahay xuquuqda soo socota marka loo eego Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah:

Waxa Aad Xaq u Leedahay In Aad Dabagal ku Sameyso Oo Aad Aragto Nuqul Ka Mid Ah Macluumaadkaas. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aad dabagal ku sameyn karto oo aad heli karto nuqul Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah marka muddo 7da cisho ah ka dib marka aad qoraal ku codsato. Haddii diiwanka aan heyno uu yahay mid elektaroonig ah (Diiwaanka Caafimaadka ee Elektaroonigga ah) waxa aad ku heleysaa hab elektaroonig ah. Waxa aad codsan kartaa macluumaadkaaga caafimaadka oo ay ka mid yihiin kan caafimaadka iyo diiwaanka biilasha iyo macluumaadka kale ee dhakhtarkaaga u adeegsaday go'aanada uu gaaray. Sida ay ogolyihiin sharciyada dawladda dhexe iyo kuwa gobolka, waxaa suurogal ah in lagaa qaado lacagta sawirka lagaaga sameeyo diiwaanka. Haddii laguugu soo gudbiyo hab elektaroonig ah, waxaa lagaa qaadayaa oo kaliya lacagta shaqaalaha.

Waxa Aad Xaq u Leedahay In Aad Xakameyso Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aad na weydiisan karto oo aan loo adeegsan ama aan la sii gudbin qeyb ka mid ah Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah sababo la xiriira daaweynta, bixinta kharashka, iyo hawlgalka caafimaadka. Waxa kale oo aad codsan kartaa in qeyb ka mid ah Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah aan loo gudbin

qoyskaaga ama saaxiibadaa ee ka qeyb qaadanaya daryeelkaaga ama aan la gaarsiin sababaha lagu xusay Ogeysiiska Qarsoodi Ka dhigista macluumaadka. Codsigaaga waa in aad ku muujisaa xakameynta gaarka ee aad dooneyso iyo cida aad dooneyso in aysan arag.

Dhakhtarkaaga waajib kuma aha inuu kugu raaco xakameynta aad codsaneyso. Haddii aanu dhakhtarkaagu kugu raacsaneyn xakameynta aad codsaneyso, waxaa suurogal ah in aynaan adeegsan ama sii gudbin macluumaadkaaga caafimaadka ee shaqsiga ah innaga oo maanka ku heyna jabinta xakameyntan haddii aan loo baahan daaweyn degdeg ah. Innaga oo taas maanka ku heyna, fadlan kala hadal dhakhtarkaaga xakameynta aad codsaneyso.

Xaq waxa aad u leedahay in aad codsan karto in aad lacag caddaan ah ku bixiso (jeebkaaga) daaweyntaada, waxa aad codsan kartaa in aad macluumaadka daaweyntaada loo gudbin ceymiskaaga caafimaadka.

Waxa Aad Xaq U Leedahay In Aad Codsan Karto In Xiriirka Lagula Soo Xiriiro Laguugu Soo diro Hababa Kale Ama Meel Gaar Ah. Waanu fulineynaa codsiyada suurogalka ah. Waxaa kale oo suurogal ah in aan shuruudo ku xirno macluumaadka aad na weydiisato gaar ahaan sida lacagta loo bixinayo ama faahfaahinta cinwaanka aad codsaneyso in laguugu soo diro ama habka laguula soo xiriirayo. Kuma weydiisaneyno faahfaahin ku saabsan sababta aad sidaas ugu codsaneyso.

Waxa Aad Xaq u Leedahay In Dhakhtarkaagu Wax ka Bedelo Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah. Taasi waxa ay ka dhigan tahay in aad codsan karto wax ka bedelka Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah ee diiwaanka kaas oo ah kan aan heyno. Xaaladaha qaarkood, waxaa suurogal ah in aan diidno wax ka bedelka aad codsatay. haddii aan diidno codsigaaga wax ka bedelka, waxa aad xaq u leedahay in aad diiwaangeliso qoraal sababta aadan go'aankeena noogu raacsaneyn waxaana suurogal ah in aan ka jawaabno qoraalkaaga oo aan kuu soo dirno nuqul ka mid ah jawaabteena.

Waxa Aad Xaq u Leedahay In Aan Kula Socodsiino Gudbinta Macluumaadka Aan Sameyno, Hadiiba Ay Dhacdo, Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga. Xuquuqdaas waxaa ka mid ah gudbinta ka baxsan daaweynta, bixinta ama hawlaha caafimaadka sida lagu xusay Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadka. Waxaa laga reebayaa gudbinta macluumaadka ee aan kuu soo dirnay haddii aad horey u ogolaatay, ee maamulaha caafimaadka, xubin qoyska ka tirsan ama saaxiibada ka qeyb qaadanaya daryeelkaaga caafimaadka, qodobo la xiriira amaanka qaranka ama sirdoonka ama ciidanka nabadgelyada (sida lagu sheegay sharciyada qarsoodi ka dhigista) ama xabsiyada, sida qeyb ahaan lagu xadiday sii gudbinta macluumaadka. Xaqa aad u leedahay in macluumaadkaan laguu soo gudbiyo waxa ay ku xiran tahay qodobada laga reebay, xakameynta iyo xuduudaha loo dhigay.

Xaq Waxa Aad U Leedahay In Aad Hesho Ogeysiiskan Oo Daabacan, Marka Aad Codsato, Xitaa Haddii Aad Ogolaatay In Laguugu Soo Diro Hab Elektaroonig Ah.

Waxa Aad Xaq U Leedahay In Aad Weydiisato Nuqul Diiwaanka Caafimaadka Oo Elektaroonig Ah Hab Elektaroonig Ah

Waxa Aad Xaq U Leedahay In Aad Qarsoodi Laguugu Soo Diro Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah. Waanu fulineynaa codsi kasta oo suurogal ah oo aan kugu soo gaarsiin karno Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah ee hababka kale ama goobaha kale, haddii aad si cad oo qoraal ah ugu muujiso qeybta Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah ee khatar ku gelin kara.

Waxa Aad Xaq U Leedahay In Lagu Soo Wargeliyo Haddii Keydka Xogta loo dhaco. Waxaanu ka dhigeynaa qarsoodi macluumaadkaaga caafimaadka mid amaan ah sida uu dhigayo sharcigu. Haddii qeyb ka mid ah macluumaadka aan kaa heyno la helo, la arko, la isticmaalo ama la sii gudbiyo, hab aan sharcigu ogoleyn waxaau ku soo wargelineynaa 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda loo dhacay keydka. Haddii ay dhacdo in lagu helo, la gaaro, isticmaalo ama loo sii gudbiyo ogolaasho

la'aan Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah haddii aan la cadeyn karin in dhab ahaan ay dhacday in Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah waa mid aad u yar.

Waxa Aad Xaq U Leedahay In Aad Codsato In Aan Laguu Soo Dirin Fariimaha Deeq Ururinta Ee Aan Kuu Soo Dirno Oo Aanan Iibin Karin Macluumaadkaaga Caafimaadka Adiga Oo

aan Ogolaasho Lagaa Helin Hababka kala duwan ee loo adeegsado xogta macluumaadka, sida xogta bukaanka oo loo adeegsado suuq geynta, waa in aad sii ogolaataa oo lagula socodsiiyaa. Isticmaal iyo sii gudbin aan lagu xusin ogeysiin waxaa la sameynayaa oo kaliya marka aad ogolaato. Haddii aad ogolaato isticmaalka iyo wadaagista Macluumaadkaaga Caafimaadka Ee Shaqsiga Ah, waad ka noqon kartaa ogolaashahaas, qoraal ahaan, maarkii aad doonto. Haddii aad ka noqoto ogolaashaha, ma isticmaali doono mana la wadaagi doono hay'adaha kale macluumaadka caafimaadka sababaha aad ku sheegtay qoraalkaaga ogolaashaha. Ma soo celin karno macluumaadka aan horey u gudbinay ka dib markii aan ku bixinay ogolaashahaaga. Waxaa waajib nagu ah in aan ilaalino diiwaanka caafimaadka ee aan kuu soo gudbino.

Waxa Aad Xaq U Leedahay In Aad Cabasho U Soo Gudbin Karto:
The U.S. Department of Health and Human Services 200 Independence Avenue, S.W.
Washington, D.C. 20201

Taariikhda dhaqangalka. Ogeysiiskan waxaa la daabacay oo uu dhaqan galay 05/20/2018

Wixii Su'aalo Ah Ku Soo Hagaaji Sarkaalka Qarsoodi Ka Dhigista. Sally St John, Madaxa Xarunta George Wellbeing ee YMCA

QIRIDDA IN LAGU SIIYEY OGEYSIISKA QARSOODI KA DHIGISTA MACLUUMAADKA

Saxiixa aad saxiixdo qoraalkan waxa aad qireysaa in aad akhrisay oo lagu siiyey nuqul (copy) Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadkaaga.

Ogeysiiska Qarsoodi Ka Dhigista Macluumaadkaaga waxaa ku xusan macluumaadka sida aan u adeegsaneyno ama u sii gudbineyno macluuumaadkaaga caafimaadka. Ogeysiisku waxa kale oo uu faahfaahin ka bixinayaa sida aad ku heli karto, wax uga bedeli karto, ama aad u xakameyn karto macluumaadkaaga caafimaadka ee sharcigu ilaaliyey.

Waxaanu kugu dhiirigelineynaa in aad dhamaantiis akhriso.

Marka aan saxiixdo, waxa aan ogolaaday in aan akhriyey oo aan fahmay xuquuqda qarsoodi ka dhigista ee aan leeyahay Ogeysiiskan.

Magaca (magaacaga oo sadexan): _____ Taariikhda Dhalashada: _____

Saxiix: _____ Taariikhda Maanta: _____